

PATIENT EDUCATION

Qubeysashada Qaliinka Ka hor Saabuunta CHG

Saabuunta Chlorhexidine Gluconate (CHG) waxa ay dishaa jeermiska waana sida saaabuunta. Oogadaada oo aad ku dhaqdo saabuunta disha jeermiska waxa ay kaa caawineysaa in ay ka hortagto caabuqa qaliinka ka dib. Ku qubeyso habeenka qaliinka ka horeeya IYO saubaxa qaliinka saabuunta CHG adiga oo raacaya talaabooyinka ku xusan warqaddan.

- Halkan waxaa ku xusan sawirada saabuunta CHG ee disha jeermiska ee aad isticmaali karto. Nooc kasta oo ka mid ah saabuunta CHG ee disha jeermiska waad isticmaali kartaa. Weydii shaqaalaha farmashiyaha haddii aadan hubin nooca aad iibsaneysa ama aad su'aal ka qabto.




- libso 2 dhalo oo markiiba 4-wiqiyadood (ounce) tahay (ama iibso 1 dhalo oo 8-wiqiyadood ah oo markiiba nus ka isticmaal. **HA ISTICMAALIN haddii aad xasaas ku tahay CHG.**
- HA XIIRIN meel jirkaaga ka mid ah (raggu garka way xiiran karaan) ilaa 2 cisho qaliinka ka hor ilaa uu ka dhamaado qaliinka.
- Waxaa laga yaabaa in saabuuntu bedesho midabka suuliga/dharka la isku tirtiro.

Habeenka qalinka ka horeeya

- Marka hore ku qubeyso saabuunta caadiga ah ee qubeyska. Dhaq oo qalaji timahaaga adiga oo isticmaalaya shaambada caadiga ah.
- Isticmaal biyo naiif ah jirka oo dhan iyo timaha ku dhaq saabuunta, shaambada iyo (conditioner).
- Ka dibna biyo cad ku nadiifi jirkaaga oo dhan. Ka dib biyaha xir oo ka soo bax goobta qubeyska.
- Biyaha ka fogoow marka aad marsaneysa CHG.
- Isticmaal hal dhalo (4 wiqiyadood) qubeyska (ama nus dhalada weyn ee 8da wiqiyadood ah).
- Istimaal maro nadiif ah oo aad jirkaaga ku mariso saabuunta CHG. Ka biloow qoortaada oo ku nadiifi qeyb kasta oo jirkaaga ilaa lugaha ka gaarto. **HA KU ISTICMAALIN SAABUUNTA CHG indhaha, dhagaha, afka, ama lugahaaga dhexdooda, siilka ama madaxa hore ee guska.**

- **LOOMA BAAHNA IN AAD ISTICMAASHO SAABUUNTA HADDII LAGAA QALAYO WIXII KA SAREEYA DAANKA AMA LUGAHA DHEXDOODA, SIILKA AMA MADAXA HORE EE GUSKA.**
 - Marka aad nadiifiso jirkaaga, si dabacsan u mari goobta qaliinka ilaa 3 daqiiqo. Fiiri calaamadda sawirka hoose ee halka lagaa qalayo.



- Biyo cad oo nadiif ah kaga dhaq jirkaaga dhamaan saabuunta CHG
- Haddii aad dareento xanuun, dhibco cascas ama cuncun ha joojin, isticmaal biyo cad oo nadiif ah in aad ku dhaqdo CHG markiiba hana marin wax dheeraad ah.
- HA ISTICMAALIN saabuunta caadiga ah, shaambo ama (conditioner) ka dib marka aad isticmaasho CHG.
- Istimaal shukumaan nadiif ah (shukumaan aadan horey u isticmaalin) si aad ugu qalajiso jirkaaga.
- HA ISTICMAALIN waxyaabaha la isku carfiyo, daawada dhididka, kareem, boolbaraha iyo barafuun.
- Dhar nadiif ah xiro (dhar aan aan horey loo xiran tan iyo markii la dhaqay).
- Ku seexo go'a nadiif ah (go'o aan horey loogu seexan tan iyo markii la dhaqay).

Subaxa Qaliinka

- **Qubeyska isticmaal saabuunta CHG kaliya HA ISTICMAALIN saabuun kale.**
- HA KU ISTICMAALIN shaambo ama (conditioner) timahaaga.
- Biyo cad ku nadiifi jirkaaga oo dhan. Ka dib biyaha xir oo ka soo bax goobta qubeyska.
- Biyaha ka fogoow marka aad marsaneyso CHG.
- Istimaal hal dhalo (4 wiiqiyadood) qubeyska (ama nus dhalara weyn ee 8da wiiqiyadood ah).
- Istimaal maro nadiif ah oo aad jirkaaga kumariso saabuunta CHG. Ka biloow qoortaada oo ku nadiifi qeyb kasta oo jirkaaga ilaa lugaha ka gaarto. **HA KU ISTICMAALIN SAABUUNTA CHG indhaha, dhagaha, afka, ama lugahaaga dhexdooda, siilka ama madaxa hore ee guska.**
- **LOOMA BAAHNA IN AAD ISTICMAASHO SAABUUNTA HADDII LAGAA QALAYO WIXII KA SAREEYA DAANKA AMA LUGAHA DHEXDOODA** Marka aad nadiifiso jirkaaga, si dabacsan u mari goobta qaliinka ilaa 3 daqiiqo. Meeshii aad xalay ku dhaqday (halka qaliinka lagu sameynayo)
- Biyo cad ii nadiif ah kaga dhaq jirkaaga dhamaan saabuunta CHG
- HA ISTICMAALIN saabuunta caadiga ah, shaambo ama (conditioner) ka dib marka aad isticmaasho CHG.
- Istimaal shukumaan nadiif ah (shukumaan aadan horey u isticmaalin) si aad ugu qalajiso jirkaaga.
- HA ISTICMAALIN waxyaabaha la isku carfiyo, daawada dhididka, kareem, boolbire iyo barafuun.
- Dhar nadiif ah xiro (dharaan aan horey loo xiran tan iyo markii la dhaqay).

La xiriir xafiiska dhakhtarka qaliinka haddii aad su'aal ka qabto sida loo qubeysto qaliinka ka hor.